

---

## **Macluumaad ku saabsan bixinta Baasaboorka Berlinpass-But iyo ku raacin Gaadiidka Lacag laáan Ardayda**

Mudanayaal iyo Marwooyinka qaaliga ah,

Haddii aad tahay Qof qaadato Lacagta Cayrta sida uu dhigayo Sharciga Lacagta la siiyo Qaxootiga, waxaa adiga iyo Caruurtaada Xaq u leedihiin Macaashka Wax Barashada iyo ka hesho (BuT).

Waxaa jira Mustaqbalka laba Walxood Cusub.Fadlan ka taxadir taas

### **Waa maxay waxaad ka taxadireeso?**

- Waxi ka bilowda **1. Mai 2018** waxaa laga bixinayaa berlinpass-BuT Landratsamt, waxi ka dambeeyo Wakhtigaas Iskuulka laga bixin maayo
- Waxi ka bilowda **1. August 2018** waxaad adiga iyo Canugaada ku raacin kartiin Gaadiidka Bulshada Lacag laáan, haddii Wadada Iskuulka leedahay dherer gooni ah.

### **Imisa ey noqoneesa dhererka Wadada Iskuulka ee Tikidka Lacg laáanta?**

Tikidka Lacag laáanta waxaa la helaa, haddii Wadada Guriga ilaa Iskuulka ka dheertahay Hal Kilometer (Galaasyada 1 bis 6) ama ka dheertaha 2 Kilometer (waxi ka bilowda Galaaska 7) .

### **Sidee u helaa Tikidka Lacag laáanta ah?**

Waa in aad u qorataa Ari Afka ah Xafiiska Degmeda qaabishan Arrinta Qaxootida (Landratsamt für Flüchtlingsangelegenheiten) (LAF) .

Xafiiska LAF waxuu ku yaalaa Darwinstr. 14-18, (Gelintaanka Bulshada: Goslarer Ufer 15), 10589 Berlin.

### **Sidee haddii an ku dhaxjiro Baska ama tareenka isku caddayn karaa in aad Tikid watto?**

Baasaboorka berlinpass-BuT waxaa lagu dhejin doonaa Mustaqbalka Warqada (gaduud) ah Warqadaas waxey caddayeesaa berlinpass-BuT waxi ka bilowda **ab 1. August 2018** in ey tahay Tikid. Uma baahnid in aad wax kale qaadatid. Adiga iyo Canugada wax Lacag ah bixin meesiin.

### **Maxaa Qasab igu ah Wakhtiga u dhexeeyo 1.Mai iyo 31.juli in aan hagaaiyo?**

Waxi ka bilowda 1.August laguma raaci karo Warqadda lagu dhejiyo oo ah („be-berlin“ Silver). Saas awgeed waxaa Qasab kuugu ah Wakhtiga laga **bilaabo 1. Mai 2018 bilaa iyo 31. Juli 2018** in aad berlinpass-BuT u geeso LAF . Halkaas ayaa inta uu socdo berlinpass-BuT lagu dhejinayaa Warqada Cusub oo (Guduud) ah. Warqadaas Cusub oo (Gaduudka) ah ayaa waxi ka bilowda 1. August 2018 lagu raaci karaa Gaadiidka Bulshada Lacag laáan.

### **Maxaa Qasab igu ah in aan qabbto hadduu berlinpass-BuT dhacayo ka hor 1.Mai 2018?**

Ilaa iyo 30 April 2018 waxaad ka qaadan kartaan adiga iyo Canugaada berlinpass-BuT Iskuulka kaas oo ku dhegen Warqad jirta („be-berlin“ Silver). Warqadaas ku dhegen berlinpass-BuT waxaad uga iibsanaa kartaa Tikid Ardayda oo, la raqiisayay Shirkada Taenada ama Bsasaka ilaa iyo 31. Juli 2018.

### **Mxaan qaban karaa haddii berlinpass-BuT uu dhacayo kadib 30. April 2018 iyo ka hor 1. August 2018?**

Waxi ka bilowda 1. Mai waxaad ka qaadaneesaa berlinpass-BuT Xafiiska Degmeda qaabishan Arrinta Qaxootida (Landratsamt für Flüchtlingsangelegenheiten) (LAF) Wakhtigaas waxi ka dambeeyo laga bixin maayo Iskuulka . Waa in aad u geeso warqad Caddayn ah ee Iskuulka iyo Sawir.Baasaboorka berlinpass waxaa ku dhegen laba Warqadood

- Warqadda hadda jirta („be-berlin“Silver) iyo
- Tan cusub Warqad (guduud) ah

### **Maxaan qaban karaa, hadduu berlinpass-BuT dhacayo kadib 1. August?**

Waxi ka bilowda 1. August 2018 adiga iyo Canugaada berlinpass-BuT iyo kii hore („be-berlin“ Silver) kuma raacin kartiin Gaadiidka Bulshada, Tikid la raqiisayay ma njiro Lacag laáan kuma raaci kartid . Hadda waxaad u baahantahay Warqadda lagu dhajiyo oo (gaduudka) ah. Saas daraadeed waa qasab Wakhtiga laga bilaabo 1. Mai 2018 ilaa iyo zum 31. Juli 2018 berlinpass-BuT in aad u geeso Landesamt für Flüchtlingsangelegenheiten (LAF). Markaas uma baahnid wax Tikid ah.Baasaboorka berlinpass-BuT ayaa markaas Tikid kuu ah.

### **Ka taxadir!**

Haddii aad isticmaashaan adiga iyo Canugaada waxi ka bilowda 1. August Gaadiidka Bulshada **adigoon** wadan Warqadda Cusub o, lagu dhajiyo Baasaboorka oo (gaduud) ah markaas waxad tihiiin adiga iyo Canugaada dad ku raacay„**Si madow ah**“. Markaa waa in aad bixisaa Lacag zaaid ah oo 60,00 Euro ah.

Salaan wacan.